

Mudane Waalid ama Koriye,

In waalid la ahaado mar kasta maahan wax fudud. Mid ka mid ah hawlahayaga ugu muhiimsan ee Xarunta caafimaadka ilmaha (child health centre (BVC)) waa caawinta qoysaska si caaruurtu u helaan jawi guri ammaan u ah. Sidaasi darteed, waxaan siinaynaa dhammaan qoysaska na soo booqanaya inay ka jawaabaan su'aalaha hoose. Su'aaluhu waxay ku saabsan yihiin arrimo saamaynaya qoysas badan. Su'aaluhu waxay qusaynayaan adiga iyo ilmaha soo booqanaya xarunta caafimaadka maanta. Buuxinta foomka waa mid ikhtiyaar ah, waadna dooran kartaa inaad dhammaan ka jawaabto, qaar ama midna ka jawaabin.

Jinsiga ilamahir: _____ Da'ada ilmaha: ____sano _____ bilood Jinsiga waalidka: _____

- Haa Maya Ma garanaysaa lambarka la Waco haddii ilmahaagu liqo wax sun ah?
- Haa Maya Miyay gurigaaga ku xiran yihiin qalabka sheega qiiqa?
- Haa Miyaa qof sigaar caba ku nool yahay gurigaaga?
- Haa Sannadkii la soo dhaafay, miyaad ka walwashay in lacagtaadu aysan ku gaarsiin bisha oo idil?
- Haa Maya Sannadkii la soo dhaafay, miyaad awoodi waysay inaad soo iibsato cunto ama dhar ilmuhu u baahnaa?
- Haa Maya Miyaad niyadjab dareentay, isku-buuqday ama dareentay rajo beel bilihii la soo dhaafay?
- Haa Maya Bilihii la soo dhaafay, miyaad dareentay xiisayn la'aan ama ku raaxaysi la'aan arrimo aad caadiyan ku raaxaysan jirtay ama danayn jirtay?
- Haa Maya Miyaad caadiyan dareentaa inaad si aad ah cadaadis u dareemayso?
- Haa Maya Miyaad dareemaysaa in ilmahaaga ay gaar ahaan adag tahay in la maareeyo?
- Haa Maya Miyaad caawinaad dheeraad ah ugu baahan tahay ilmahaaga?
- Haa Maya Miyaad ka walwalsan tahay luminta koontoroolka ilmahaaga?
- Haa Maya Miyaa lammaanahaaga hadda ama hore weligaa ku niyadjabiyay, ku caawiyay ama xoog kuu sheegtay, tusaale ahaan go'aamiyay cidda aad la kulmi karto, inta aad lacag haysan karto, dharka aad xiran karto?
- Haa Maya Miyaa lammaanahaaga hadda ama hore weligaa kuu hanjabay, ku riixay, ku feeray, ku laaday ama kuu gaystay nooc kale ee jismi dhibaatayn?
- Haa Maya Miyaad weligaa ka baqday lammaanahaaga ama qof kale oo kugu hareeraysan?

Immisa goor ayaad cabtaa cabitaan khamro ku jirto?

- Marna Bille ama ka yar 2-4 goor bishii 2-3 goor usbuucii 4 ama ka badan usbuucii

Immisa cabitaan oo khamro ku jirto (eeg tusaalaha hoose) ayaad maalin caadi ah cabtaa markii aad wax cabayso?

- 1-2 3-4 5-6 7-9 10 ama ka badan

Immisa goor ayaad lix ama ka badan cabitaan khamro cabtaa xaaladdiiba?

- Marna In ka yar bishii Bille usbuucii Maalin kasta ama qiyaastii maalin kasta



- Haa Maya Miyay jiraan dhibaatooyin aad doonayso in lagaa caawiyo maanta?

Mahadsanid!